## Maxaa Dhacaya Marka Aad Dalbato Dacwad Dhagaysiga Masruufka Ilmaha

- Cid kasta oo dalbanaysa dhagaysiga Waaxda Taageerada Ilmaha (Division of Child Support, DCS) waxay isku dayaysaa inay samayso, dhaqan geliso, ama wax ka badasho taageerada ilmaha. Dacwad dhagaysiga waxaa ku qabta garsoore madax banaan oo dhexaad ah Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka (Office of Administrative Hearings, OAH).

- OAH waxay boosta kuugu soo diri doonaa Ogeysiiska Dacwad Dhagaysiga oo leh taariikhda, saacada, iyo goobta dacwad dhagaysigaaga. Celcelis ahaan, dhagaysigu waxa uu qaadan doonaa ilaa 60 daqiiqo. (Waxa aad qorshaysataa inaad 90 daqiiqo ka horeyso.)

U sheeg OAH Markiiba hadii cinwaankaaga ama taleefan lambarkaaga isbeddel ku imaado.

## Sida Loogu Diyaar Garoobayo Dhagaysiga Taageerada Ilmahaaga

- Waxa aad ku matali kartaa naftaada dacwad dhagaysiga ama waxa aad dooran kartaa looyar ama qof kale inuu ku matalo. (Ma dooran kartid shaqaale Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka ah (Department of Social and Health Services, DSHS) employee.) Adiga ayaa iska bixinaya kharashka looyarkaaga.

- DCS waxaa matali doona looyar sarkaalka sheegashada. Sarkaalka sheegashada ayaa boosta kuugu soo diri doonaa bushqada dhagaysiga oo ay ku jiraan waraaqaha dhinacyada la siiyay. Si taxadir leh u akhri xirmada dacwad dhagaysiga oo waa inaad soo qaadataa wakhtiga dacwad dhagaysiga.

- Haddii aad haysato dukumeentiyo aad rabto in garsooruhu arko, fadlan u soo dir OAH. Hadii waraaqaha uu ku jiro macluumaad aanad doonaynin inay cid kale aragto, waxa aad masaxdaa macluumaadka kahor inta aanad soo dirin waraaqaha. (Tusaale ahaan, tirtir ciwaanada, lambarada telefoonada, lambarada Soshal Sekuritiga, lambarada akoonada bangiga, iwm.) Tusaalooyinka dukumeentiyada aad rabto in garsooruhu arko:
    - Foomamka celinta cashuuraha iyo W-2
    - Xaashimaha Masruufka Ilmaha
    - Amarada maxkamada ee saamaynaya caruurtaada
    - Bixinta qaybaha kharaskhka wakhtigan, bayaanka gunooyinka, ama duwaanada bixinta lacagta laxaad la'aanta
    - Kharashka caafimaadka ama kharashka caymiska caafimaadka ee caruurta
    - Cadaynta wixii kharash taageero ee la bixiyay.

Dacwad dhagaysigaaga waxaa lagu qaban doonaa taleefanka.

- Hadii lagu siiyay amar in aanad usoo dhawaan, u sheeg OAH iyo DCS Markiiba.

- Hadii aad u baahan tahay turjubaan, OAH ayaa kusiin doonaa mid bilaash ah. Hadii aad qabto laxaad la'aan waxa aad dalban kartaa qaabilaad kaa caawisa inaad ka qayb gasho dhagaysiga. Waxa aad dalban kartaa turjubaan ama qaabilaad adiga oo kala hadlaya xafiiska OAH lambarka ku yaal Wargelintaada Dhagaysiga.

- Hadii aad u baahan tahay inaad dalbato isbadal wakhtiga ama taariikhda dhagaysigaaga, waxa aad ula xidhiidhaa sarkaalka sheegashada iyo OAH sida ugu dhakhsaha badan. Kaliya xaakinka ayaa bixin kara wax ka badalka jadwalka wakhtiga dhagaysiga. Kahor inta aanad gaadhin go'aanka, xaakinka waxa uu doonayaa inuu kuu sheego hadii dhinacyo kale ay ogolaadaan ama ay diidaan dalabkaaga.
    - Garsoorku waxa uu diidi doonaa dalabkaaga hadii aanad u haysan sabab wanaagsan wax ka beddel.
    - Hadii uu xaakinku badalo wakhtiga dhagaysigaaga, waxa aad haysataa bushqada si aad u isticmaaso wakhtiga dib loo qabanayo balanta dacwad dhagaysiga.
    - Hadii wakhti cusub la bixiyo laakiin taageero ilmaha ah aan la samaynin, dhinaca kale waxa uu ka dalban karaa garsooraha inuu soo saaro amar in si kumeelgaadh ah taageerada ilmaha lagu joojinayo.
    - Haddii aad xiisaynayso inaad samayso baaritaan sharci ah, linkiyada ayaa laga heli karaa barta www.oah.wa.gov iyo www.washingtonlawhelp.org.

**Daawo fiidyawga muunada dacwad dhagaysiga OAH ee ku jira www.oah.wa.gov**

- Waa kuwan ikhtiyaaro lagu yaraynayo kharashka kaalmada sharciga:

| Magaca Isha | Lambarka Telefoonka | Websatka |
|---|---|---|
| CLEAR: Degmada King<br>CLEAR: Ka Baxsan Degmada King | La hadal 211<br>888-201-1014 | www.resourcehouse.com/win211 |
| Mashruuca Ciidan Hawlgabay | 855-657-8387 | http://nwjustice.org/veterans |
| WA State Bar Association | | http://www.wsba.org/Resources-and-Services/Find-Legal-Help |
| Barnaamijka Moderate Means | 855-741-6930 | http://www.wsba.org/Legal-Community/Volunteer-Opportunities/Public-Service-Opportunities/Moderate-Means-Program |

**Waxa aad la xidhiidhi karaa sarkaalka sheegashada DCS hadii aad doonayso inaad isku daydo inaad xaliso kiiskaaga kahor dacwad dhagaysiga, ama hadii aad qabto su'aalo ku saabsan shuruucda. Wakiilku kuma siin karo talo sharci.**

Sida Loogu Qayb Galayo Dhagaysiga Taageerada Ilmahaaga

- Waxa aad raacdaa tilmaamaha ku qoran dukumentiga Ogeysiiska Dacwad Dhagaysiga.
  Sarkaalka sheegashada ayaa kula soo hadli doona taariikhda iyo saacad dhagaysiga. Hadii aanad ka jawaabin oo aanad ka qayb gelin, waxa aad ku waayi kartaa xuquuqdaada dhagaysiga. Dhagaysigu waxa uu socon karaa adiga la'aantaa.
    - Wargelinta waxaa laguugu sheegi karaa inaad bixiso lambar taleefan oo lagaala soo xidhiidhi karo.
    - Waa in aan joogtaa meel anteenada taleefanka wanaagsan tahay.
    - Fadlan ogsoonaw inay tahay inuu kula soo hadli karo taleefan aan lambarkiisu soo bixini.

- Sarkaalka sheegashadu waxa uu la hadli karaa dhinacyada si uu iskugu dayo inuu xaliyo tan.

    - Hadii dhinacyadu gaadhaan heshii, sarkaalka sheegashada ayaa kulasoo hadli doona oo xaakinkana waxa uu ka dalban doonaa inuu ansixiyo heshiiska.
    - Hadii ayna dhinacyadu heshiinin, sarkaalka sheegashada ayaa kula soo hadli doona oo waxa uu u sheegi doonaa xaakinka in dhinacyadu ay diyaar u yihiin inay bilaabaan dhagaysiga.
        - Xadiga laga wada hadlay sarkaalka dhagaysigu way ka duwanaan kartaa xadiga xaakinku amray marka la go'aaminayo kiiskaaga.
- Hadii aad qorshaysato inaad isticmaasho markhaati, waxa uu markhaatigiisa dhiiban doonaa wakhtigaaga dhagaysiga. Waxa aad sheegtaa lambarka markhaatiga lagala hadli karo. U sheeg markhaatiga saacada iyo taariikhda dacwad dhagaysiga iyo sida uu uga qayb galayo. U sheeg markhaatiga inay tahay in taleefanka uu la tago meel anteeno wanaagsan oo taleefankiisana uu kusoo dhici karo taleefan bilaa lambar ahi.
- Garsoorku waxa uu duubi doonaa dacwad dhagaysiga. Garsoorku waxa uu ku bilaabi doonaa inuu u sheego arrinka dhinacyada oo waxa uu u sharixi doonaa waxa dhici doontaa wakhtiga dhagaysiga. Garsoorku waxa uu naqdin doonaa bushqada dhagaysiga (iyo waraaqaha kale ee la heley) oo waxa uu go'aamin doonaa wixii cadaymaha la gelinayo.
- Sarkaalka sheegashada ayaa caadiyan soo bandhiga kiiska DCS marka kowaad. Dhinac kastaa waxa uu u yeesho kartaa markhaatigiisa oo waxa uu su'aalo waydiin karaa markhaatiga dhinaca kale ay u yeedheen. Markhaatigu waxa uu markaatiga furi doonaa isaga oo la dhaariyay. Garsoorka ayaa sidoo kale su'aalo waydiin kara.
- Dacwad dhageysiga ka dib, garsooruhu wuxuu gaari doonaa go'aan kaas oo laguugu soo diri doono boostada ku dhawaad 21 maalmood ka dib xiritaanka diiwaanka dacwad dhageysiga.
- Hadii aanad ku qancin go'aanka, tilmaamaha racfaan qaadashada waxa ay ku ooli doonaan dhamaadka amarka garsoorka.